# Ebola S & J: Muxuu Yahay oo Laga Qabanayaa Gudaha Degmada San Diego?

Faafidda Ebola ee hadda waxa xarun u ah saddex wadan oo ah Afrikada Galbeed: Gini, Laybeeriya, iyo Siira Liyoon, inkasta oo faafid dheeraad ah ku iman karto wadamada Afrikaanka ah ee la deris ah. Qoraalkan yar wuxu sharaxayaa macluumaad guud oo ku saabsan Ebola iyo waxa Hay'adda Caafimaadka iyo Adeegyada Bini'aadanka ee San Diego sameynayso si looga hortago faafidda, oo loo badbaadiyo deganeyaasha. Ebola halis weyn **kuma** aha dadweynaha Maraykanka, sababta oo ah sida cudurku u fido.

## Waa maxay Ebola?

- Ebola waa cudur daran, oo badanaa loo dhinto oo uu sababo fayraska Ebola. Astaamuhu waxay soo if baxaan gudaha 21 maalmood ka dib soo gaadhista.
- Dadka uu soo gaadhay Ebola lagama qaado cudurka iyaga oo leh astaamaha Ebola mooyaane: kuwaasoo ah qandho, madax-xanuun daran, muruq xanuun, matagid, shuban, calool xanuun, ama dhiigid aan la sharixi karin ama buusbuusan.

## Sidee Ebola u fidaa?

Ebola wuxu ku fidaa taabasho toos ah oo lala yeesho:

- Dhiigga ama dheecaanada jidhka (sida candhuuf ama kaadi) ee qof cudurku soo gaadhay oo leh astaamaha cudurka.
- Alaab (sida irbado) uu wasakheeyay dheecaano cudureysan.
- Xayawaan cudurka qaba, ama marka la cuno hilib ugaadhsi oo cudurka qaba.

## Ebola hawada ma la isugu gudbiyaa?

Maya. Ebola ma aha cudur neefsashada lagu kala qaado sida hargabka, sidaa daraadeed **laguma** gudbin karo hawada.

## Ebola ma ka qaadi karaa cunto ama biyo la wasakheysan cudurka ama uu soo gaadhay?

Maya. Ebola **ma** fido inta uu soo marayo cunto, MARKA LAGA REEBO hilibka ugaadhsiga.
Maya. Ebola **ma** fido inta uu soo marayo biyo.

## Ebola ma ka qaadi karaa qof qaba cudurka laakiin aan qabin wax astaamo ah?

Maya.  Dadka **aan** qabin astaamo **lagama** qaado cudurka. Si Ebola loo gudbiyo, waa in qofku taabasho toos ah la yeesho qof la buka astaamaha Ebola.

## Maxaa la sameeyay si dadka safarka ah ee buka ee Galbeedka Afrika looga horjoogsado inay fuulaan diyaarad?

Xarumaha Ka-hortagga iyo Xakameynta Cudurada (Centers for Disease Control and Prevention) (CDC) ayaa gargaar ka geysaysanaya in sameeyo ka fiirin firfircoon iyo dedaalo waxbarasho oo laga hirgalinayo wadama cudurku saameeyay ee Gini, Laybeeriya, iyo Siira Liyoon ee Galbeedka Afrika si looga hortago in dad safar ah oo jirrani soo raacaan diyaarado. Sidoo kale, Eeriboodhada ku yaala Gini, Laybeeriya, iyo Siira Liyoon ayaa dhammaan dadka safarka ah ee dibadda u soo baxaya ka fiirinaya astaamaha Ebola. Dadka safarka ah waxa laga rabaa inay ka jawaabaan su'aalo caafimaad. CDC ayaa u diraya shaqaale aagaga cudurku saameeyay si loo kobciyo awoodda shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee deegaanka oo loo bixiyo caawimaad si loo xakameeyo cudurka.

## Waa maxay ka fiirinta lagu qabto gudaha Maraykanka?

Shan eeriboodh oo waaweyn oo caalami ah ayaa dadka ka imanaya Gini, Laybeeriya, iyo Siira Liyoon, ka fiiriya qandho iyo soo gaadhis Ebola oo suurtogal ah, sida ay sheegeen CDC iyo Wasaaradda Ammaanka Dhulka Maraykanka.

Ka fiirin—lagu raadinayo qandho— ayaa ka socota Eeriboodhada Caalamiga ah ee JFK ee New York, Washington-Dulles, Newark, Chicago-O'Hare, iyo Atlanta. In ka badan boqolkiiba 94 dadka safarka ah ee ka imanaya Galbeedka Afrika waxay Maraykanka ka soo galaan goobahaas galista.

Iyada oo la raacayo tilmaamaha CDC,  maamulada caafimaadka dadweynuhu waxay wadaan ka-warhayn firfircoon oo ah ka dib imaanshaha oo lagu sameeyo socotada ka yimid Gini, Laybeeriya, ama Siira Liyoon.  Ka-warhaynta firfircoon ee ah ka dib imaanshaha macnaheedu waxa weeyey socotada aan qabin qandho ama astaamo kale oo waafaqsan kuwa Ebola ayay waaxyaha caafimaadka ee heer gobol iyo degmo ka warhayn doonaan maalin kasta mudo ah 21 maalmood laga bilaabo taariikhda ay ka soo ambabaxeen Galbeedka Afrika.

## Maxay Degmada San Diego qabanaysaa si deganeyaasheeda looga badbaadiyo Ebola?

Degmada San Diego waxay qabanaysaa waxyaabahan soo socda:

- Waxay la shaqeysaa bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee degamada si loo garto Ebola.
- Waxay leedahay habraacyo, shaqaale xirfadle ah, iyo shabakad shuraako oo xoogan si looga hortago in cudurku sii fido.

(ka sii socda dhabarka)

- Waxay la shaqeysaa Gobolka California iyo CDC si loo sameeyo hagid iyo qalab loogu talogalay baadhitaanada caafimaad dadweyne, waxana la bixiyaa talooyin ku saabsan xakameynta cudur gaadha shaqaalaha daryeelka caafimaadka si looga hortago in cudurku fido.
- Waxay macluumaad jadiidsan u dirtaa dadweynaha guud, socotada caalamiga ah iyo shuraakada caafimaad dadweyne.
- Waxay ogeysiis caafimaad u dirtay bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee degmada kaasoo ku saabsan muhimadda ay leedahay in la qaado talaabooyin looga hortagayo faafista fayraskan, sida loo baadho ee loo gooniyeeyo bukaanka la tuhmay, iyo sida iyaga naftooda isaga badbaadin lahaayeen cudur qaadis.

Haddii cudurka Ebola ku dhaco qof degmada ah, shaqaale si fiican u tababaran ayaa baadhi doona oo soo heli doona ciddii uu dhawaan qofkaasi la yeeshay xidhiidh. Degmadu waxay u baahan doontaa in la helo qof kasta oo taabasho toos ah la lahaa qofka markii qofkaasi ay ka muuqdeen astaamaha cudurku ka dibna waxa la gooniyeyn doonaa dadkii xidhiidh la yeeshay haddii iyagana ay ka muuqdaan astaamaha cudurka si loo joojiyo fidista cudurka. Qof kasta oo taabasho la yeeshay qof qaba cudurka waxa lala socon doonaa 21 maalmood iyada oo laga fiirinayo wax ah calaamadaha fayraska Ebola.

## Macluumaad dheeraad ah:

- Wararka Ebola: www.cdc.gov/vhf/ebola/
- Caafimaadka Socotada: www.cdc.gov/travel
- Tilmaamista Diyaaradaha:www.cdc.gov/quarantine/air/managing-sick-travelers/ebola-guidance-airlines.html